

# **Sheekooyinkii ugu wanaagsanaa** **c.rizaaq maxamed cilmi**

Sheekooyinkii ugu wanaagsanaa

أحسن القصص waxaan u qoray

Soomaalida jecel sheekooyinka

Islaamiga ah, rabana inay u sii

gudbiyaan caruurtooda.

<https://islamhouse.com/61666>

- [Sheekooyinkii ugu wanaagsanaa](#)
  - [Hordhaca qoraha](#)
  - [Nebi Aadan nabadgelyo](#)  
[korkiisa ha ahaatee](#)
  - [Nebi Idriis nabadgelyo](#)  
[korkiisa ha ahaatee](#)

- [Nebi Nuux nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Nebi Huud nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Nebi Saalax nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Nebi Ibraahin nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Nebi Luud nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Nebi Ismaaciil nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Nebi Isxaaq nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Nebi Yacquub nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Nebi Yuusuf nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Nebi Ayuub nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)

- [Nebi Zul-kifli nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Nebi Yoonis nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Nebi Shuceyb nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Nebiyadii loo soo direy  
tuulada nabadgelyo  
korkooda ha ahaatee](#)
- [Nebi Muuse nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Nebi Haaruun nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Nebi Daa'uud nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Nebi Saleebaan nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Nebi Ilyaas nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)

- [Nebi Alyasca nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Nebi Cuseyr nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Nebi Sakariye nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Nebi Yaxye nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Nebi Ciise nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Luqmaan nabadgelyo  
korkiisa ha ahaatee](#)
- [Aasiyo Eebbe ha ka raali  
noqdee Boqoraddii  
mu'minadda ahayd](#)
- [Boqoraddii Balqiisa Eebbe  
ha ka raali noqdee](#)
- [Marwo Maryan Eebbe ha ka  
raali noqdee](#)

- [Dhalinyaradii godka Eebbe ha ka raali noqdee](#)

## [Sheekooyinkii ugu wanaagsanaa](#)

Qore CabdiRisaaq Maxamed Cilmi  
“ina Warfaa”

Weli lama daabicin kitaabkan

Qof kasta ayaa xaq u leh inuu  
daabacdo kitaabkan oo ma  
dhowrsana

La soo xiriirka qoraha ee ku saabsan  
kitaabka

Haddii aad xiiseyneysid kitaabkan  
oo aad dooneyid inaad ogaato sidii  
lagu heli lahaa, iyo haddii aad ku  
aragtid khaladaad, Eebbe kaliya  
ayaa dhamaystirane ha kaa

abalmariyo. Waxaad fadlan kala soo xiriiri kartaa cinwaanka qoraha kitaabkan bariidka xaasuubkiisa "e-mailkiisa" oo ah:

ina\_warfaa@hotmail.com.

Mahadnaq

Waxaan ugu horrayntii u mahadnaqayaa Eebbe, oo igu galadaystay nimcooyin tira badan oo aanan koobi karin. Ka dibna waxaan u mahadnaqayaa dhammaan dadkii igu caawiyey talo, fikrad iyo dhiiragalin waxaan idin leeyahay  
جزاكم الله خيرا .

**Hordhaca qoraha**

Waxaan ku bilaabayaa magaca  
Eebbaha Naxariistaha guud  
Naxariistaha gaar.

Waxaa mahad iska leh Eebbe,  
naxariis iyo nabadgalyadiisana  
korkooda ha ahaato nebi Maxamed,  
reerkiisa iyo intii raacdey  
dhamaantood.

Kani waa sheekooyinkii ugu  
wanaagsanaa

أحسن القصص

ulajeedaydu waxay tahay in aan  
ugu dhawaado Eebbe, aniga oo ugu  
qoraayo afka soomaaliga sheekooyin  
islaami ah, dadka jecel rabana iney u  
sii gudbiyaan caruurtooda.

Waxaan ugu dambayntii Eebbe ka baryayaa in uu aniga “qoraaga” kitaabkan iyo intii i caawisayba uu miisaanka wanaagyadeena noogu daro maalin aysan xoolo iyo caruur waxba tarayn.

Qoraha

Helsinki jimce 16.12.1427 H. oo ku aaddan 5.1.2007 M.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

## **Nebi Aadan nabadgelyo korkiisa ha ahaatee**

Wuxuu ahaa aabihii dadka oo dhan, Eebbaa dhoobo ka abuuray una tujisiiyay malaaigtiisa, waxaan ka ahayn Sheydaan, oo diidey inuu u tukado nebi Aadan. Eebbana wuxuu



ku yiri Sheydaankii maxaadan u sameyn waxaan ku faray, **Sheydaankii oo islaweyni iyo xasad ka buuxo ayaa ku jawaabey:** Aniga ayaa ka wanaagsan nebi Aadan, oo waxaad iga abuurtey dab, isagana waxaad ka abuurtey dhoobo.

Markaas baa Eebbe ku yiri Sheydaankii waxaa tahay mid laga fogeeyay naxariisteyda.

Sheydaankiina wuxuu Eebbe ka baryey inuu u kaadiyo inta laga gaarayo aakhiro, Eebbana wuu ka aqbalay. Kolkaas buu wuxuu doonay inuu aarguto, **oo wuxuu yiri:**

Eebow sharaftaadaan ku dhaartee dhamaantood “dadka” waan baadiyeen, waxaan ka ahayn adoomadaada daacadda kuu ah.

**Eebbana wuxuu ku yiri Sheydaankii:**

Waxaan ka buuxin naarta Jahanamo adiga iyo wixii ku raacay dhamaantood. Eebbana wuxuu baray nebi Aadan magacyada. Wuxuuna u abuuray xaaskiisii Xaawo, dejiyeyna labadoodii janada, ugana digay ineysan u dhowaan geed ku yaalay jannada, **hase ahaatee sheydaankii ayaa shaki ku abuurey oo wuxuu ku yiri:** Ma idin tusaa geed haddaad cuntaan aydan weligiin dhimaneyn aadna heleysaan boqortooyo aan dhamaaneyn dabadeedna wey cuneen, ka dibna Eebbaa dhulka u soo dejiyey, waxayna weydiisteen dembidhaaf wuuna ka aqbalay. Eebbana wuxuu awoodsiyey iney ku noolaadaan dhulka. Farayna iney isaga keligiis caabudaan kuna booriyey dadka taasi, kana yeelay

rasuulkii Eebbe ee loo soo direy  
ilmihisii, wuxuuna ahaa nebigii ugu  
horeeyey.

### **Nebi Idriis nabadgelyo korkiisa ha ahaatee**

Nebi Idriis wuxuu ka mid yahay  
rususha sharafta leh ee Eebbe  
kitaabkiisa Qur'aanka sharafta leh  
noogu sheegay. Wuxuuna sidoo kale  
ka mid yahay rususha inaan  
rumeyno nala faray, oo Eebbaa  
noogu sheegay nebi Idriis Qur'aanka  
magaciisa iyo inuu ahaa nebi runlow  
ah.

### **Nebi Nuux nabadgelyo korkiisa ha ahaatee**

Nebi Nuux wuxuu ahaa dhowrsane runlow ah, oo Eebbe u soo direy dadkiisa inuu hanuuniyo, **ugana digo cadaabka aakhiro isagoo leh:**

Tolkeeyow Eebbe caabuda mana lihidiin Eebbe isaga aan ahayn waxaan idinkaga cabsanayaa cadaab maalin weyn. **Markaas bey waxay ugu jawaabeen:**

Runtii Nuuxow waad baadiyeysan tahay. **Markaas buu wuxuu nebi Nuux ugu**

**jawaabay:** Tolkeeyow ma baadiyeysni ee hase ahaatee waxaan ahay rasuul Eebbe soo direy waxaan idin soo gaarsiinayaa risaalada Eebbehey waana idinla talin oo

waxaan Eebbe ka ogahay waxaydaan ka ogeyn. Markuu nebi Nuux ogaadey iney rumeyn doonin intii horey u rumeysey mooyee.

Ayuu wuxuu yiri Kii i barbaariyow dhulka ha uga tegin qof gaal ah. Oo wuxuu sii raaciyey haddaad qof gaal ah dhulka uga tegtid waxay baadiyeynayaan adoomadaada mana dhalayaan ku xun oo gaal ah mooyee. Ka dib baa Eebbe faray inuu markab sameeyo, oo uuna markabkaasi saaro lamaane kasta oo ku nool dhulka ay ka mid yihiin mu'miniintii rumeeysey, hase ahaatee aysan ku jirin xaaskiisa iyo wiilkiisa oo iyagu waxay ahaayeen gaalo. Dabadeed baa waxaa yimid duufaan oo dadkii gaalada ahaa biyihii ku wada dhinteen.

**Nebi Huud nabadgelyo korkiisa ha ahaatee**

Nebi Huud wuxuu ka dhashay qabiil la yiraahdo Caad oo loo soo direy. Reer caad waxay ahaayeen dadka ugu dheer uguna xoog weyn xiligoodii, waxayna ku faani jireen xoogooda. Hase ahaatee waxay ahaayeen gaalo, oo waxay caabudi jireen sanamyada, weyna difaaci jireen, una dagaalami jireen sanamyadooda dartood.

Nebigoodana wey beeniyeen, weyna ku jeesjeesi jireen. Waxay ahayd reer Huud maadaama ay is og yihiin iney ugu xoog weyn yihiin dadka, iney ogaadaan Eebihii iyaga abuuray inuu iyagana ka xoog badan yahay.

Nebi Huudna wuxuu ku oran jirey dadkiisa eraygii ay nebiyada oo dhan ku dhihi jireen dadkooda.

Oo wuxuu ku dhihi jirey:  
Dadkeeyow Eebbe caabuda ma lihidiin Ilaah isaga aan ahayn ee miyeedan cabsanayn.

Ka dibna Eebbe ayaa ku laayey dabeel daran gaaladii reer Huud, kuna badbaadiyey Nebi Huud iyo dadkii rumeeyay.

### **Nebi Saalax nabadgelyo korkiisa ha ahaatee**

Nebi Saalax wuxuu Eebbe u soo direy reer Samuud. Waxay ahaayeen dad abaaldaran, maxaa yeelay Eebbaa wuxuu siiyey xoolo fara

badan, hase ahaatee  
Barbaariyahooda ma aysan rumeyn  
ee waxay caabudi jireen sanamyada  
ay ka dhaxleen aabayaalkoodii. Reer  
Samuud waxay isugu faani jireen  
awoodooda. Dabadeed baa Eebbe u  
soo direy nebi Saalax inuu ugu  
bishaareeyo jano hadday rumeeyaan,  
ugana digo naar hadday rumeyn  
waayaan, hase ahaatee wey  
beeniyeen. Waxayna ka codsadeen  
inuu ula yimaado calaamad ay ku  
gartaan inuu nebi yahay si ay u  
rumeeyaan, wuxuuna ula yimid nebi  
Saalax hal. Wuxuuna faray reer  
Samuud ineysan dhibin, hase  
ahaatee waxay ku adkeysteen  
islaweynidoodii oo dabadeed waxay  
dileen hashii. Eebbana wuxuu ku  
ciqaabay qeylo daran, markaas bey



halkii ku dhinteen. Waxaana Eebbe halkii ku badbaadiyey nebi Saalax iyo intii rumeyseey.

## **Nebi Ibraahin nabadgelyo** **korkiisa ha ahaatee**

Nebi Ibraahin wuxuu ahaa saaxiibkii Eebbe, waana mid ka mida shanta rusul ee ugu wanaagsan Eebbe agtiisa, wuxuuna ka dhigey rasuul, wuxuuna ka doortey uun badan oo Eebbe abuuray. Nebi Ibraahin waxaa loo soo direy dad caabuda xidigaha oo uu la noolaa, wuxuuna dadkiisii ugu yeeri jirey iney Eebbe keligiis caabudaan, hase ahaatee wey beeniyeen. Waxayna isku dayeen iney gubaan, Eebbe ayaana ka badbaadiyey. Eebbana wuxuu

wiilashiisii Ismaaciil iyo Isxaaq ka yeelay nebiyo.

Waxayna nebi Ibraahin iyo wiilkiisii nebi Ismaaciil wada dhiseen Kacbada.

### **Nebi Luud nabadgelyo korkiisa ha ahaatee**

Eebbe wuxuu nebi Luud u soo direy dadkiisii, si uu u hanuuniyo uguna yeero iney caabudaan Eebbe.

Waxayna ahaayeen dad xun oo sameeya xumaanta, kuna xadgudba martida. Waxayna ahaayeen rag ka raadiya xumaan ragga kale, oo markuu nebi Luud ugu yeeray iney xumaanta iska daayaan, waxay isku dayeen iney saaraan isaga. Nebi Luud waxaa rumeeyay qaar ka mida

reerkiisii, xaaskiisa iyadu ma rumeyn. Markuu nebi Luud ka quustey dadkiisii ayuu Eebbe wuxuu ka baryey in isaga iyo intii raacdey Eebbe badbaadiyo, laayana xumaan falayaashii. Waxaa dabadeed nebi Luud u yimid Malaaiig, waxayna saareen nebi Luud iyo intii rumeyseey, oo intii kale ee gaalada ahaa ku laayey dhagxaan sumadeysan.

## **Nebi Ismaaciil nabadgelyo** **korkiisa ha ahaatee**

Nebi Ismaaciil wuxuu ahaa curadkii nebi Ibraahin iyo marwo Haajar. Wuxuu uga tegey nebi Ibraahin xaaskiisii Haajar iyo ilmaheedii nebi Ismaaciil goob ku taaley Makka, Eebbe oo sidaa faray darteed, iyagoo

heysta biyo yar iyo timir. Markuu ka dhamaadey wixii yaraa ee ay wateen, ayey marwo Haajar bilowdey iney warwareegato iyadoo wax la cabo ama la cuno baadi goobeyso, ilaa Eebbe uu ku toosiyo biyihii Samsamka. Waxaana u imaan jirey dad badan oo socoto ah, goobtiina waxay noqotey meel dad dego, biyihii Samsamka ee halkaasi ka dilaacay dartiis. Oo ka dib wuxuu Eebbe faray nebi Ibraahin inuu dhiso Kacbada oo waxaana la dhisey wiilkiisii nebi Ismaaciil. Ka dibna wuxuu nebi Ibraahin riyo ku arkey isagoo Eebbe farayo inuu gowraco wiilkiisii, wuxuuna u sheegay wiilkiisii nebi Ismaaciil. **Wuxuuna ugu jawaabey nebi Ismaaciil:** Aabaheygow samee wuxuu Eebbe

ku faray waan dulqaadan hadduu Eebbe yiraahdee. Eebbana wuu ka badbaadiyey gowricii. Wuxuuna ahaa nebi Ismaaciil mid dulqaad badan, balan oofiya oo farana reerkiisa tukashada iyo wax bixinta. Wuxuuna dadka fari jirey in Eebbe keligiis la caabudo.

## **Nebi Isxaaq nabadgelyo korkiisa ha ahaatee**

Nebi Isxaaq wuxuu ahaa ina nebi Ibraahin iyo marwo Saara, wuxuuna dhashay walaalkiis nebi Ismaaciil ka dib, oo waxay ahaayeen ilmo aabe. Malaaigtii ayaana ugu bishaareysey nebi Ibraahin iyo marwo Saara dhalashadiisii, markii ay u socdeen halkii ay deganaayeen dadkii nebi Luud loo soo direy, si ay u laayaan

gaaladii xumaanta sameyn jirey. Eebbana wuxuu Qur'aanka noogu sheegay nebi Isxaaq inuu ahaa mid aqoon badan. Kana yeelay nebi dadka ku hanuuniya falalka wanaagsan. Nebi Isxaaqna wuxuu dhalay nebi Yacquub oo loo yaqaaney Israaiil.

### **Nebi Yacquub nabadgelyo** **korkiisa ha ahaatee**

Nebi Yacquub waa ina nebi Isxaaq ina nebi Ibraahin, **waxaana la oran jirey Israaiil**: Waxaana loola jeedaa: Cabdullaahi. Wuxuuna ahaa nebi loo soo direy dadkiisii oo ah mid dhowrsan. **Wuxuuna la dardaarmey caruurtiisii markuu dhimanayey oo wuxuu ku yiri**: Maxaad caabudeysaan markaan dhinto ka

dib? Markaas ayey yiraahdeen waxaan caabudeynaa Eebbahaaga, Eebbaha aabayaalkaa Ibraahin, Ismaaciil iyo Isxaaq, Eebbe keligiis, waxaanu ahaaneynaa muslimiin. Nebi Yacquubna wuxuu dhalay nebi Yuusuf.

## **Nebi Yuusuf nabadgelyo korkiisa ha ahaatee**

Nebi Yuusuf waa ina nebi Yacquub ina nebi Isxaaq ina nebi Ibraahin. Aabihiisna aad buu u jeclaa, waxaana la dhalatey kow iyo toban walaalo ah. Habeen habeenada ka mida ayuu wuxuu arkey kow iyo toban xiddig, qoraxda iyo dayaxa oo u tukanayaan. Nebi Yuusufna wuxuu u sheegay aabihiis wuxuu arkey, aabihiisna wuxuu ku yiri ha u

sheegin walaalaha. Hase ahaatee Sheydaankii ayaa ku abuurey maseyr walaalihiis, oo waxay isku raaceen iney ku ridaan ceel dheer guntiisa, oo waxay yiraahdeen waxaa cuntey yeey. Ka dib waxaa arkey dad reer miyi ah ceelkii ayeyna ka soo saareen, waxayna ku gateen lacag aad u yar. Waxaana ka gatey boqorkii Masar, xaaskiisii ayuuna farey iney korsadaan, hase ahaatee isagii ayey damacdey, markuu diideyna wey qiyaantey xabsi ayaana la geliyey. Ka dib baa Eebbe muujiyey inuu yahay dembilaawe, kana saarey xabsigii. Boqorkiina wuxuu madax uga dhigey arimihii dhaqaalaha, taasoo maamulkeeda si wanaagsan u hayey sanadihii abaarta. Ka dibna wuxuu u



yeertay walaalihiis iyo waalidkiis, weyna u tukadeen “sharaf darteed”, halkaasna waxaa ku furantey riyadiisii.

## **Nebi Ayuub nabadgelyo korkiisa ha ahaatee**

Nebi Ayuub wuxuu lahaa xoolo fara badan iyo caruur badan, hase ahaatee Eebbaa imtixaaney oo wuxuu ka qaadey xoolihii iyo caruurtiiba, sidoo kale wuxuu ku ridey xanuuno fara badan oo hayey muddo badan heer ay gaartey iney dadkii ka fogaadaan, waxaan ka aheyn xaaskiisii oo iyadu wey u dulqaadatey, ilaa Eebbe caafimaadkiisii, caruurtiisii iyo xoolihiisii dib ugu soo celiyey. **Kor ahaaye Eebbana wuxuu ku yiri**

Qur'aankiisii sharafta lahaa isagoo  
amaanaya addoonkiisii Ayuub:

Wuxuu ahaa mid dulqaata addoon  
wanaagsan runtii Eebbe u soo  
noqda.

### **Nebi Zul-kifli nabadgelyo korkiisa ha ahaatee**

Nebi Zul-kifli wuxuu ka mid ahaa  
nebiyaalkii suubbanaa ee dulqaadan  
jirey. Qur'aankana wax intaas dheer  
ka ma uusan sheegin.

### **Nebi Yoonis nabadgelyo korkiisa ha ahaatee**

Nebi Yoonis wuxuu Eebbe u soo  
direy dadkii Niinawaa. Wuxuuna  
ugu yeeray iney caabudaan Eebbe  
keligiis, hase ahaatee wey diideen

weyna isla weynaadeen markaas ayuu nebi Yoonis iskaga tegey. Wuxuuna u sheegay in la cadaabi doono muddo saddax habeen ka dib. Kolkaas ayey cabsadeen oo rumeeyeen, Eebbana ma uusan cadaabin. Wuxuuse nebi Yoonis raacay doon, markaas ayey doontii degi gaartey baddii gudaheeda, oo waxay go'aansadeen iney qori tuur sameeyaan oo qofkii ay ku soo aaddo saddax jeer qori tuurkaas lagu tuuro badda. Waxayna ku soo aaddey nebi Yoonis oo dabadeed wuxuu isku tuurey baddii, isla markiiba waxaa liqey nibiri, nibirigiina ma cunin Eebbe dartiis. Markaas buu nebi Yoonis baryey Eebbihiis inuu ka saaro gudcurka, Eebbana wuu ka aqbaley. **Dadkii**

loogu soo direy inuu gaarsiyo  
risaalada: wuxuu Eebbe soo faray,  
waxay gaarayeen boqol kun iyo ka  
badan.

## **Nebi Shuceyb nabadgelyo** **korkiisa ha ahaatee**

Nebi Shuceyb wuxuu Eebbe u soo direy dadkii Madyan. Waxayna caabudi jireen geed. Markey wax miisaamayaana wey dhimi jireen. oo ma aysan siin jirin dadka waxay lahaayeen. Markaas buu nebi shuceyb wuxuu ugu yeeray iney Eebbe caabudaan, dadkana kula dhaqmaan si garsoor leh. Hase ahaatee wey diideen weyna isla weynaadeen. Waxayna ku yiraahdeen nebi Shuceyb dhagax ayaannu kugu dileynaa, waannu ku

fogeyn. Waxayna ka codsadeen inuu gabal cirka ah ku soo kor rido. Markaas baa waxaa lagu laayey qeylo daran.

### **Nebiyadii loo soo direy tuulada nabadgelyo korkooda ha ahaatee**

Eebbe baa labo Rasuul wuxuu u soo direy tuulo, Markaas baa labadii Rasuul tuuladii rumeyn weysey. Kolkaas buu Eebbe u soo direy Rasuul saddaxaad tuuladii. Kor ahaaye Eebbe wuxuu Qur'aankiisa noogu sheegay inuu rumeeyay nin, dadkiisiina ugu yeeray iney rumeeyaan rusushaas, hase ahaatee wey dileen, oo dabadeed Eebbana geliyey janno.

## Nebi Muuse nabadgelyo korkiisa ha ahaatee

Eebbe nebi Muuse wuxuu u soo direy Fircoon iyo dadkiisii. Wuxuuna siiyey labo mucjiso oo midkood ay aheyd ushii cuneysey masaska, tan kalena waa gacantiisii oo intuu geliyo jeebkiisa uu dabadeedna ka soo saarayey iyadoo cad. Nebi Muuse wuxuu Fircoon ugu yeeray inuu Eebbe keligiis caabudo. Fircoonna wuxuu la dagaalamay nebi Muuse, oo wuxuu isugu yeeray sixiroolayaashiisii ugu waaweynaa si uu nebi Muuse u qiyaamo, hase ahaatee nebi Muuse ayaa ka adkaadey sixiroolayaashii oo Eebbe ayaa u gargaarey. Dabadeed wuxuu Eebbe faray nebi

Muuse isaga iyo intii raacdey iney ka baxaan Masar. Markaas baa waxaa soo daba galay Fircoon iyo ciidankiisii. Kolkii ay u soo dhawaadeen nebi Muuse iyo asxaabtiisii baddii oo ay is yiraahdeen ciidankii Fircoon waa idin soo gaareen ayuu Eebbe faray nebi Muuse inuu ku garaaco ushiisa badda si ay u badbaadaan, halkaasna uu ku dhinto Fircoon kaas oo Eebbe dadka uga dhigey waano.

## **Nebi Haaruun nabadgelyo** **korkiisa ha ahaatee**

Nebi Haaruun wuxuu ahaa nebi Muuse walaalkiis iyo saaxiibkiis loo soo wada direy Fircoon inuu rumeeyo Eebbe, maxaa yeelay nebi Haaruun wuxuu ahaa codkar.

Wuxuuna nebi Muuse madax uga dhigay walaalkiis nebi Haaruun dadkiisii, markuu aadey inuu Eebbe kula kulmo buurtii Duur korkeeda. Hase ahaatee waxaa dhacdey belaayadii Saamir, kaas oo reer Israaiil u sameeyay weyl ‘lo’ ka sameysan dahab si ay u caabudaan. Markaas buu nebi Haaruun ugu yeeray dadkii iney u soo noqdaan Eebbe caabudistiisa oo ay iska daayaan weyshan ay caabudayaan, hase ahaatee wey isla weynaadeen. Nebi Muuse markuu ku soo noqday dadkiisii oo uu arkey waxay caabudayaan buu wuxuu ku eedeeyay walaalkiis nebi Haaruun. Nebi Haaruunna wuxuu u sheegay walaalkiis nebi Muuse iney dili gaareen dadkii markuu isku dayey



inuu ka hor tago waxay  
caabudayeen.

## **Nebi Daa'uud nabadgelyo** **korkiisa ha ahaatee**

Eebbe wuxuu siiyey nebi Daa'uud  
aqoon iyo xikmad. Wuxuuna u  
fududeeyay markuu leeyahay  
Eebbow adigaa hufan iney la  
qaadaan buuraha iyo shimbiraha,  
waxaana loo jilciyey birta. Nebi  
Daa'uud wuxuu ahaa addoon Eebbe  
caabudistiisa daacad ugu ah una  
mahadnaqa. Wuxuu soomi jirey  
maalin, maalinna wuu afuri jirey,  
habeenkiinna wuxuu u istaagi jirey  
Eebbe caabudistiisa. Eebbana  
wuxuu ku soo dejiyey nebi Daa'uud  
kitaabkii Sabuur. Wuxuuna siiyey

boqortooyo weyn farayna inuu ku maamulo si garsoor leh.

## **Nebi Saleebaan nabadgelyo** **korkiisa ha ahaatee**

Nebi Saleebaan Eebbaa wuxuu siiyey aqoon iyo xikmad. Wuxuuna baray hadalka shimbiraha iyo xoolaha kale, wuxuuna u fududeeyay dabeysha iyo Jinka. Nebi Saleebaan wuxuu soo booqan jirey ciidankiisii mararka qarkood. Markaas buu wuxuu waayey shimbirkii Hudhudka ahaa maalin maalmaha ka mid ah, dabadeed baa waxaa yimid Hudhudkii markuu maqnaa in muddo ah. Wuxuuna ku yiri nebi Saleebaan waxaan ka imid Saba', waxaana kaaga sidaa war run ah oo waxaan ku soo arkey

goobtaasi naag boqorad ah oo la siiyey wax walba, waxayna caabudayeen iyada iyo dadkeedaba qoraxda. Markaas ka dib buu nebi Saleebaan wuxuu qorey warqad, wuxuuna faray Hudhudkii inuu u geeyo warqaddaasi boqoraddii Saba'. Hudhudkiina wuxuu u geeyay warqaddii Balqiisa, markii ay heshay warqaddii nebi Saleebaan uu ku lahaa ha isla key weynaanina ee ii imaada idinkoo muslimiin ah. Kolkaas ayey Balqiisa iyo madaxdeedii waaweynaa u tageen nebi Saleebaan. Ka dib markii Balqiisa ay aragtey wuxuu Eebbe siiyey nebi Saleebaan ayey muslintey iyada iyo dadkeediiba, nebi Saleebaan ayaana guursadey Balqiisa.

## **Nebi Ilyas nabadgelyo korkiisa ha ahaatee**

Nebi Ilyas Eebbe ayaa wuxuu u soo direy reer Baclabak magaalo ku taala Lubnaan. Wuxuuna ugu yeeray iney caabudaan Eebbe, ee aysan caabudin sanamka la yiraahdo Bacla. Gaaladiina wey beeniyeen nebigoodii Ilyas, Eebbana wuxuu ugu balanqaadey iney geli doonaan cadaabta.

## **Nebi Alyasca nabadgelyo korkiisa ha ahaatee**

Nebi Alyasca wuxuu ka mid ahaa addoomadii wanwanaagsanaa. Waxaana lagu sheegay kitaabkii Towreed, Qur'aankana waxaa lagu sheegay labo jeer.

## **Nebi Cuseyr nabadgelyo korkiisa ha ahaatee**

Nebi Cuseyr wuxuu ka mid ahaa nebiyadii reer Israaiil. Eebbe ayaa wuxuu nafta ka qaadey nebi Cuseyr dabadeedna boqol sano ka dib soo nooleysiiyey. Nebi Cuseyr wuxuu dib u baray reer Israaiil diintoodii oo wuxuu baray kitaabkii Towreed kolkii ay hilmaameen ka dib.

## **Nebi Sakariye nabadgelyo korkiisa ha ahaatee**

Nebi Sakariye wuxuu ahaa addoon wanaagsan oo dhowrsan. Wuxuuna dadka ugu yeeri jirey diinta toosan. Wuxuuna soo korsadey Maryan “nebi Ciise hooyadiis”. Wuxuuna Eebbe ka baryey inuu siiyo ilmo

wanaagsan, Eebbana wuu ka aqbalay oo wuxuu siiyey nebi Yaxye kaas oo dadka isna ugu yeeri jirey iney caabudaan Eebbe keligiis.

## **Nebi Yaxye nabadgelyo korkiisa ha ahaatee**

Nebi Yaxye waa ina nebi Sakariye. Wuxuuna ku dhashay ducadii uu Eebbe ka aqbalay, markuu nebi Sakariye uu Eebbe ka baryey inuu siiyo ilmo wanaagsan. Wuxuuna Eebbe ugu yeelay aabihiis calaamad dhalashadii nebi Yaxye, in uusan nebi Sakariye la hadlin dadka saddax habeen oo toos ah. Nebi Yaxyena wuxuu ka mid ahaa nebiyaalkii suubbanaa. Wuxuuna ahaa sidoo kale baari, dhowrsan oo

Eebbe ka cabsada tan iyo  
yaraantiisii.

## **Nebi Ciise nabadgelyo korkiisa ha ahaatee**

Nebi Ciise waa sidii nebi Aadan oo  
kale oo wuxuu Eebbe ka abuurey  
ciidda, wuxuuna ku yiri ahow  
wuuna ahaadey. Nebi Ciisena waa  
ina Maryan rasuulkii Eebbe,  
ereygiisii uu ku ridey Maryan.  
Waana nebigii horey u sii sheegay  
inuu nebi Maxamed imaan doono.  
Eebbana wuxuu siiyey xujooyin,  
wuxuuna ku xoojiyey Ruuxul-  
Qudsi. Nebi Ciisena waa mid ka  
mida shanta rusul ee ugu weyn,  
isaga oo aad u yar ayuu dadka la  
hadley, wuxuu ka sameeyay dhoobo  
qaab shimbir ayuu intuu afuufey

dabadeed shimbir noqotey, wuxuuna daaweeyay cudurada aan laheyn daawada, wuxuuna soo nooleeyay qof dhintey, intaas oo dhan oo mucjiso ah Eebbe ayaa u fududeeyay. Wuxuuna nebi Ciise dadkiisii ugu yeeray iney Eebbe keligiis caabudaan, hase ahaatee wey diideen, weyna isla weynaadeen, weyna ka soo horjeesteen, mana rumeyn dad yar mooyee. Eebbe ayaana cirka u qaadey, wuxuuna dhulka u soo dejin doonaa markuu doono si uu dadka marqaaati uga noqdo.

**Luqmaan nabadgelyo korkiisa ha ahaatee**



Eebbe kor ahaaye wuxuu  
Qur'aankiisa ku yiri: Oo runtii  
waxaanu siinay Luqmaan xikmad.

Luqmaan nasabkiisa layskuma  
raacsano iyo goortuu noolaa. Sidoo  
kale layskuma raacsano ma wuxuu  
ahaa nebi mise nin suubban? hase  
ahaatee culumada badankood waxay  
leeyihiin wuxuu ahaa nin suubban.  
Xikmaddii Eebbe uu siiyeyna waxay  
ahayd fahamka diinta iyo caqliga.

### **Aasiyo Eebbe ha ka raali noqdee** **Boqoraddii mu'minadda ahayd**

Boqoraddu waxay ku kortay guri  
boqortooyo, waxayna ku nooleed  
nolosha boqorada, waxayna arki  
jirtey boqorka kibirkiisa iyo  
awoodiisa, iyo sida ay uga

dambeeyaan dadka boqorka, sidaas  
ay tahayna iimaan ayaa qalbigeeda  
galay. Waxayna ka bariday  
Rabbigeed inuu ka badbaadiyo  
noloshan, wuuna ka aqbalay  
Rabbigeed ducadeedii, wuxuuna ugu  
yeelay tusaale dadkii mu'miniinta,  
oo wuxuu Eebbe kor ahaaye ku yiri  
Qur'aankiisii : ( Oo wuxuu Eebbe  
tusaale ugu soo qaadanayaa dadkii  
rumeeyey xaaskii Fircoon "Aasiyo"  
mar ay tiri Rabbigeeyow iiga dhis  
agtaada qol jannada igana nabadgeli  
Fircoon iyo wuxuu sameeyo igana  
nabadgeli dadka gardaroolayaasha  
ah ). Suuradda at-taxriim: 11.

Rasuulkii Eebbana n.n.k. wuxuu yiri  
: ( Dumarka ugu wanaagsan ee reer  
jannaad waa : Khadiija ina

Khuwaylid, Faadumo ina Maxamed, Maryan iyo Aasiyo ). Axmed. Iyadu waa Aasiyo ina Muzaaxim –xaaskii Fircoon – taasoo u ahayd tusaale uu waariyey Qur’aanka mu’minadda si run u rumeysay Rabbigeed, Waxay ahayd qoftii markii ay ogaatay jidka saxda ah raacday iyadoon ka cabsanayn xumaan, oo waa tii rumeysay Eebbe rumayn dhab ah. Hanjabaadii Fircoonna dheg jalaq uma aysan siin, kumana guuleysan inuu ka fogeeyo jidka toosan iyo hanuunka. Waxay ganacsi la gashay Eebbe, waa ayna ku faaidey ganacsigeedii, waxay ku gadatay magaceedii boqornimo, xoolaheedii iyo adeegayaasheedii qiimo qaali ah, oo ah qol ku yaala jannada iyo iney xaas rasuulka ugu noqoto ”aakhiro”.

Waxaa lagu sheegay marwo Aasiyo Eebbe ha ka raali noqdee sheekadii nebi Muuse n.k. markuu Eebbe u waxyooday nebi Muuse hooyadiis iney ku riddo nebi Muuse sanduuqa, sanduuqaasna ay ku riddo badda, uu ku jiro nebi Muuse, hirkuna wuxuu u wadi xagga xeebta uu ku yaallo madaxtooyada Fircoon; oo dabadeed waxaa soo qaaday gabdhihii, waxayna soo geliyeen madaxtooyadii, markay aragtay xaaskii Fircoon ilmahaasi ku jira sanduuqa; ayaa Eebbe aad u jecleesiiyey.

Oo Fircoon ayaa u yimid inuu dilo – siduu ku samayn jirey ilmihii kale ee ay dhaleen reer Israaiil – oo waxay ka codsatay inuusan dilin; si ay uga

dhigato ilmo maadaama aysan dhalin ilmo. Sidaas ayuuna Eebbe ku badbaadiyey nebi Muuse oo uu ku noolaado gurigii Fircoon, **Eebbe kor ahaaye wuxuu yiri:** (Oo waxaan u waxyoonnay Hooyadii "nebi" Muuse iney nuujiso oo haddaad u cabsato ku rid badda oo ha ka cabsan oo ha murugoon waannu kuu soo celin oo waxaannu ka yeeli mid ka mid ah rususha. Oo waxaa soo qaatay reer Fircoon si uu ugu noqdo col iyo murug runtii Fircoon iyo Haamaan iyo labadooda ciidan waxay ahaayeen dembiilayaal. Waxay tiri xaaskii Fircoon "Aasiyo" waa inoo indho qabowski aniga iyo adiga ha dilin waxaa laga yaabaa inuu wax na taree ama aan ka

dhigano ilmo. (iyagoon dareemeyn).  
Alqisas 7-9.

Marwo Aasiyo waxay ahayd  
garaadley, naxariisley, kumeyna  
raacin islaweynadii uu qabey  
ninkeeda, umana rumeyn  
ilaahnimadii uu sheeganayey iyo  
iney dhaleen ilaahyo.

Markuu korey nebi Muuse oo uu  
weynaaday wuxuu aaday Madyan,  
isagoo ka baxsanaya dhibkii Fircoon  
iyo ciidankiisii dabadeedna wuxuu  
ku noqday Masar mar kale markuu  
Eebbe rasuulnimo u soo diray –  
waxay ka mid ahayd xaaskii Fircoon  
dadkii ugu horeeyay ee rumeeya  
nebi Muuse. Ugamana cabsan  
Fircoon ninkeedii iney rumeysay  
Eebbe, markaasuu isla sii

weynaaday, sidee ayey xaaskiisa nolosha ay wada qeybsadaan ku rumeysay, oo isaga ay ku rumeyn weysay. Oo wuxuu bilaabay inuu cadaabo si ay uga gaalowdo, oo wuxuu faray in loo cadaabo sida ugu daran; si gaalnimadii dib ugu noqoto, hase ahaatee isma bedelin oo waxay Rabbigeed ka bariday inuu ka nabadgelyo Fircoon iyo wuxuu sameeyo.

Eebbana wuu ka aqbalay ducadeedii, maxaa yeelay waxay rumeysay Rabbigeedii, waxayna u adkeysatey iimaankeedii darteed si kastoo loo cadaabo, **ka dibna waxay istaahishay iney ka mid noqoto dumarkii jannada ku waarayey oo rasuulkii Eebbe run buu sheegay markuu yiri:**

( Waxaa la dhamaystiray niman badan, lamana dhamaystirin dumarka waxaan ka ahayn Aasiyo xaaskii Fircoon, Maryan ina Cimraan, runtiina wanaaga Caaisho dumarka ka wanaagsan tahay waa sida Sariidka ”cunto ka kooban rooti, hilib iyo maraq” uu uga wanaagsan yahay cuntooyinka kale ). Albukhaari, Muslim, At-tirmidi iyo ina Maajah.

## **Boqoraddii Balqiisa Eebbe ha ka raali noqdee**

Maalin maalmaha ka mid ah ayey ka kacday hurdadeedii goor aroor hore ah iyadoo isu diyaarineyso iney aadaan macbadka qoraxda iyada iyo dadkeedii reer Saba’ si ay u soo caabudaan qoraxda. Isla xiligaas



waxaa noolaa nebi Saleebaan n.k., isaga iyo ciidankiisana waxay caabudi jireen Eebbe. Eebbana wuxuu siiyey nebi Saleebaan boqortooyo weyn. Wuxuuna sameystay nebi Saleebaan ciidan weyn oo ka kooban dadka, jinka iyo shimbiraha. Nebi Saleebaan wuxuu soo booqan jirey ciidankiisii mararka qarkood. Markaas buu wuxuu waayey shimbirkii Hudhudka ahaa maalin maalmaha ka mid ah, dabadeed baa waxaa yimid Hudhudkii markuu maqnaa in muddo ah. Wuxuuna ku yiri nebi Saleebaan waxaan ka imid Saba', waxaana kaaga sidaa war run ah oo waxaan ku soo arkey goobtaasi naag boqorad ah oo la siiyey wax walba, waxayna caabudayeen iyada iyo

dadkeedaba qoraxda. Markaas ka dib buu nebi Saleebaan wuxuu qorey warqad, wuxuuna faray Hudhudkii inuu u geeyo warqaddaasi boqoraddii Saba'. Hudhudkiina wuxuu u geeyay warqaddii Balqiisa, waxayna isugu yeertay madaxdeedii si ay ula tashato, waxayna u sheegtay iney warqad ka heshay nebi Saleebaan kuna yiri ha isla key weynaanina iina imaada idinkoo muslimiin ah. Kolkaas ayey Balqiisa iyo madaxdeedii waaweynaa u tageen nebi Saleebaan. Ka dib markii Balqiisa ay aragtey wuxuu Eebbe siiyey nebi Saleebaan ayey muslintey iyada iyo dadkeediiba, waxaana guursadey nebi Saleebaan.

## Marwo Maryan Eebbe ha ka raali noqdee

Wuxuu Eebbe kor ahaaye Qur'aankiisa noogu sheegay iney Malaaigtii ku yiraahdeen Maryan “nebi Ciise hooyadiis” nabadgelyo korkooda ha ahaatee: (Markiina ay Malaaigtii ku yiraahdeen Maryameey Eebbe ayaa ku doortay qof suuban kaa dhigay kaana doortay dumarka adduunka oo dhan). **Aali Cimraan: 42.**

Rasuulkii Eebbana wuxuu ka yiri: (Dumarkii adduunka ugu wanaagsanaa waxay ahaayeen: Maryan, Aasiyo, Khadiijo iyo Faadumo).

ina Xibbaan.

Waxaa jiri jirey nin la yiraahdo  
Cimraan ina Maataan iyo  
marwadiisa Xanna ina Faaquud,  
waxayna caabudi jireen Eebbe.  
Maalin maalmaha ka mid ah ayaa  
waxay ka bariday Eebbe inuu siiyo  
ilmo, Eebbana wuxuu siiyey gabar,  
waxayna u bixisay Maryan. Muddo  
yar ka dib waxaa geeriyooday  
aabbaheed iyadoo yar. Ka dibna  
waxaa la wareegay barbaarinteedii  
nebi Zakariye.

Maryan markii ay weynaatay ayaa  
Eebbe wuxuu u soo direy maalin ka  
mid ah maalmaha malag la yiraahdo  
Jibriil inuu u sheego iney dhali  
doonto Masiix “nebi Ciise”  
nabadgelyo korkooda ha ahaatee.

## **Dhalinyaradii godka Eebbe ha ka raali noqdee**

Sheekadan waxaa lagu sheegay Qur'aanka kariimka, suuradda al-kahaf, aayadaha 9-26.

Waa baa waxaa jirtey tuulo ay ku nool yihiin dad gaalo ah. Tuuladaasi boqorkeedii iyo dadkeediiba jidkii saxda ahaa way ka leexdeen.

Waxayna Eebbe caabudistiisii la wadaajiyeen wax aan dhib u keeni karin waxna tari karin. Weyna iska caabudeen iyagoon u heysanin wax cad Eebbanimadooda. Sidaas ay tahayna way difaaci jireen Ilaahyadaas ay sheegayeen. Raali ugama aysan ahayn inuu qof xumaan ku sameeyo. Dhib ayey u

geysan jireen qofkii aan rumeyn, oo  
aan caabudin.

Bulshadaasi xun, waxaa ka soo  
baxay koox dhalinyaro ah oo garaad  
leh. Koox yar oo ka shaqeysiisey  
garaadkoodii, oo diidey iney u  
tukadaan waxaan ahayn  
Abuurahoodii, Eebbaha ay ku jiraan  
gacantiisa wax waliba. Waxay  
ahaayeen dhalinyaro rumeeyay  
Eebbe, hanuunkiina u kordhiyey,  
uuna ku hagay jidkii hanuunka.

Ma aysan ahayn dhalinyaradaasi  
nebiyo iyo rasuul toona. Waajibna  
kuma ahayn sida rasuulada oo kale  
iney ugu yeeraan dadkooda  
risaalada. Ee waxay ahaayeen koox  
iimaan wanaagsan leh, uma aysan  
ogolaanin dadkoodii iney Eebbe

caabudista wax la wadaajiyaan,  
waxayna dadkii ku yiraahdeen ma u  
heysaan caddeyn inuu jiro ilaahyo  
aan ahayn Eebbe.

Ka dibna waxay go'aansadeen iney  
ka tagaan tuuladii iyagoo aadaya  
meel ay ku badbaadayso diintoodii  
iyo naftoodii oo ay ku caabudaan  
Eebbe. Illeen tuuladu dadka ku nooli  
waxay ahaayeen dad xun oo baadi  
ah.

Dhalinyaradii waxay go'aansadeen  
iney ka baxaan tuuladii, iyagoo ku  
socda god cidlo' ah si ay ugu  
badbaadaan. Waxay ka baxeen  
tuuladii balaarneed iyagoo la socdo  
eygoodii kuna socda god ciriiri ah.  
Waxay uga soo tageen guryahoodii  
raaxada badnaa, iney degaan god

cidlo' ah. Waxay ka soo tageen qololkoodii, sariirahoodii, oo ay doorteen god ciriiri ah oo mugdi ah.

Taasi wax cusub ku noqon meyso qofka qalbigiisu iimaan ka buuxo. Qofka mu'minka ahi lama degaanka wuxuu u arkaa beer hadduu dareensan yahay inuu Eebbe la jiro. Wuxuuna u arkaa godka madaxtooyo, hadduu u doorto godkaasi Eebbe dartiis.

Dhalinyaradaasi ugama aysan soo tegin tuuladoodii adduun raadis iyo xoolo, ee waxay uga soo tageen iyagoo doonaya Eebbe raalli ahaanshihiisa. Goob kasta oo ay ku caabudi karaan Eebbe oo ayna ku helayaan raalli ahaanshihiisa way



uga wanaagsan tahay tuuladii ay ka yimaadeen.

Waxay dhalinyaradii seexdeen godkii, wuxuu fariistay eygoodii iriddii godka isagoo ilaalinaya.

Markaasi baa waxaa dhacday mucjiso Ilaahi ah, maxaa yeelay dhalinyaradii waxay seexdeen saddax boqol iyo sagaal sanadood.

Intii u dhexeysey mudadaasi, qoraxdu waxay ka soo baxeysey dhinaca midig ee godkoodii waxayna u dheceysey dhinaciisa koonfureed, mana soo gaari jirin falaaraheeda maalinta gelinkeeda hore iyo gelinkeeda dambaba.

Weyna is gedgedin jireen intey hurdayeen, si aaney jirkoodu wax u gaarin. Qofkii arki lahaana wuu

cabsan lahaa, maxaa yeelay wey hurdaan, hase ahaatee waa iyagii oo soojeeda marba siday dhinac isugu gedgedinayaan darteed.

Saddax boqol oo sanadood ka dib, Eebbe ayaa mar kale soo saaray. Waxay ka kaceen hurdadii dheereed, hase ahaatee ma aysan ogeyn intey hurdayeen. Waxaana ka muuqatay iney muddo dheer hurdayeen.

**Waxay is weydiyeen:** meeqa ayaanu hurdaynay?! markaasay isu jawaabeen: waxaanu hurdeyney maalin ama maalin barkeed.

Waxay la soo baxeen lacagtii ay wateen, ka dibna mid iyaga ka mid ah ayey weydiisteen inuu magaalada aado si uu ugu soo gado lacagtii cunto wanaagsan, oo dabadeed si

dhuumasho leh ugu soo noqdo iyadoon qofna dareemin, maxaa yeelay waxaa laga yaabaa iney ciqaabaan ciidanka boqorka ama kuwo kale oo xumaan falayaasha tuulada ka mid ah hadday ogaadaan arintooda. Oo waxaa dhacda in la yiraahdo kala doorta haddaad rabtaan inaad noolaataan waa inaad Eebbe caabudistiisa ilaahyo kale la wadaajisaan sidii hore oo kale, haddaad diiddaana waa la idin dhagaxeen intaad ka dhimaneysaan.

Ninkii mu'minkii ahaa wuxuu soo aaday tuuladii, hase yeeshee maba aha tuuladii uu yaqaanay. Tuuladii dhismayaalkeedii iyo guryaheedii wey is bedeleen, sidoo kale waxaa is bedeley cuntadii iyo lacagtii, wuxuu

la fajacay sidee iskugu bedeli kartaa  
tuuladii maalin iyo habeen  
gudaheed. Dabcan dadkii tuulada  
degganaa iyagana waxay la yaabeen  
ninkii dharkiisa iyo lacagtii uu  
watey.

Tuuladii ay ka soo tageen  
dhalinyaradii muddo ka dib waxaa la  
halaagay boqorkii xumaa, waxaana  
boqor u noqday nin wanaagsan.  
Dadkii waxay noqdeen mu'miniin,  
dadkiina waxay u riyaaqeen  
dhalinyaradii mu'miniinta ahayd.  
Maxaa yeelay waxay ahaayeen  
dhalinyaradaasi mu'miniintii ugu  
horeysey ee tuuladaasi, oo waxay  
tuuladoodii uga tageen diintoodii  
darteed, waana kuwan dib ugu soo  
noqday tuuladoodii.

Ka dib markii ay u cadaatay  
mucjisadii dadkii tuulada deganaa  
dhalinyaradii dhintey ee la soo  
nooleeyey, oo ay ogaadeen inuu  
Eebbe awoodo inuu soo nooleeyo  
qofkii dhintey, oo ay ku arkeen  
indhahoodii, ayuu Eebbe naftii ka  
qaaday dhalinyaradii. Illeen waa  
inuu dhintaa qof kastaa mar uun.

Tixraac qoraalo

● قصص الأنبياء، للإمام ابن كثير.

● تفسير القرآن.

الحمد لله الذي بنعمته تتم الصالحات

Waxaa mahad iska leh Eebbe kaa  
soo galaddiisu ku dhamaadaan  
wanaagyaalku